



Halkan waxaa ku qoran dhowr wargalin oo muhiim ah oo hormarinaysa habqabka iyo ku haboonaanta raacitaanka gaariga Access.

Qorshaha Kala-guurka Xeerka Dadka Degmada King ee Muwaadiniinta Maraykanka ah ee Qabo Naafonimo

Metro Degmada King waxay ka shaqaynaysaa sidii ay dadka naafada ah ugu fududayn lahayd isticmaalka gaadiidka dadweynaha, waxaana rabnaa inaanu fikradaada maqalno!

Gaadiidka dadweynuhu waa waddo loo maro fursadaha sababtoo ah waxay ka caawisaa isku xirka dadka shaqada, dugsigiyo iyo meelaha kale ee muhiimka ah. Laakin dadka naafada ah, way ku adkaan kartaa inay yimaadaan Maamul Goboledka King. Dad badan oo naafada ah ayaa ku tiirsan gaadiidka dadweynaha si ay u aadaan shaqada marka loo eego dadka aan naafada ahayn.



Metro Degmada King waxay rabtaa inay hubiso in qof walba, iyadoon loo eegin awoodaha, ay u isticmaali karaan gaadiidka dadweynaha si badqab iyo sinaan leh. Waana sababta aan u maalgalinayno Qorsheheena Kala Guurka Muwaadiniinta Maraykan ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA), si ay nooga caawiyaan inaan si wanagsan u fahano sida barnaamijyadeenu u shaqeeyaan iyo caqabad kasta oo bulshooyinkeenu ku qabaan helitaanka adeegyadayada. Qorshahan kala guurka ayaa naga caawin doona inaan hormarino dhismayaasheena oo aan hubino in adeegyadeena ay u wanaagsan yihiin qof walba.

Halkan waxaa ku qoran waxa aan samaynayno si aan u wanaajino wax walba:

- Baaritaanka xeerarka, barnaamijyada iyo adeegyada Metro, ee la xiriira dadka naafada ah.
- La hadalka dadka naafada ah si ay wax uga bartaan waayo-aragnimadooda.
- Bixinta talooyinka si loo sii hormariyo helitaanka adeega.
- Barashada ku saabsan sida wakaaladaha kale ee gaadiidka ay ugu adeegaan deganayaashooda naafada ah.

- Samaynta qorshe lagaga saarayo caqabadaha xarumahayaga iyo hormarinta helitaanka barnaamijyadayada iyo adeegyadayada.

Noo sheeg waxyaabaha ku saabsan waayo-aragnimadaada Metro!

Booq publicinput.com/kc-metro-ada-plan si aad u akhriso wax badan oo ku saabsan Qorshaha Kala Guurka ADA Metro oo aad samayso sahan yar oo xog aruurin ahaaneed si aad nagula wadaagtid fikradaada. Sahanka waxaa loogu talagalay in lagu wargeliyo Qorshaha Kala-guurka ADA iyadoo la caawinayo Metro Degmada King aqoonsato oo mudnaanta siiso hormarinada loo baahan yahay si loogu adeego dadka naafada ah. Sahanku waxa uu wax ka weydiinayaa waayo-aragnimada la xiriirta barnaamijyada, adeegyada Metro iyo hawlaha, caqabad kasta oo helitaanka Adeegyada Metro iyo waxa ay noqon doonaan Metro mudnaanta ugu sareysa si loo horumariyo helitaanka dadka naafada ah.

Haddii aad wax su'aal ah qabtid, kala xiriir Cristina Gonzalez
CRGonzalez@kingcounty.gov ama ka wac 206-263-6819.

Sidee ayaan ku ogaan karaa in gaarigayga Access uu ku imaanayo wakhtiga saxda si uu ii qaado?

Helitaanka waxa ay ku siinaysaa saddex hab oo aad ku heli karto macluumaadka ku saabsan wakhtiga imaatinka ee gaarigaaga.

1. **Access ETA:** Waxaad wici kartaa Access qiyaasta wakhtiga imaatinka (ETA, estimated time of arrival) adeega 24 saac maalintii si aad u hesho macluumaadka safarka wakhtiga dhabta ah ee nidaamkayaga tooska ah. Ka wac Khadka Gaari raaca Access Rideline nambarka 206-205-5000 (WA Relay: 711). Shaashada kore riix 1 oo raac talaabooyinka Waxaa lagu weydiin doonaa lambarkaaga aqoonsiga (ID) iyo sanadka dhalashadaada. U isticmaal Access ETA si aad u hesho: Wakhtigayaga la qiyaasayo qaadista - laga bilaabo 15 daqiiqo kahor inta uusan bilaabmin wakhtiga qaadistaada; wakhtiga keenitaan - ka dib markaad gasho gaariga Access. Tani aad ayay waxtar u leedahay haddii aad qof kula kulanto goobta u socoto markaad timaado.

- 2. La hadal Shaqaalaha Balan Qabtaha:** Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Access Rideline nambarka 206-205-5000 (WA Relay: 711) oo la hadal Shaqaalaha Balan qabtaha inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah (8:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo, todobada maalmood ee todobaadka). Shaqaalaha Balan qabtaha wuxuu hayaa macluumaad la mid ah midka khadka tooska ah ee Access ETA.
- 3. Wicitaanka iyo Fariinta Qoraalka Wakhti hore:** Waan kusoo wici karnaa ama fariin qoraal ah ayaan kuu soo diri karnaa wax yar kahor inta uusan caasiga Access kuu iman si uu kuu qaado. Adeegyada Wicitaanka iyo Fariinta Qoraalka Wakhti hore waxay u baahan tahay in la sii diyaariyo kahor wakhtiga iyada oo lala kaashanayo Wakiilka Adeegyada Rider. Waxa kale oo aad dejin kartaa adeeg loo yaqaan *ogaysiisyada imaanshaha dhow*, halkaas oo ogeysiisyada la diro 15 daqiiqo kahor baabuurka ETA.

SU'AALAHADA INTA BADAN LA IS WEYDIIYO

Sidee buu nidaamku u qiyaasaa wakhtiga la diri karo ogaysiisyada?

ETA waxay ku salaysan tahay goobta safarku iyo halka uu u socdo. Nidaamku wuxuu xisaabiyaa midan isagoo la socda dhamaystirka soo qaadistii hore ama ka dejinta ee wadada iyo qiyaasta wakhtiga ay qaadanayso inaad ku hesho.

Waa maxay sababta aan mararka qaarkood u helo ogeysiis anoo kusii jiray horaan baabuurka?

Haddii uu jiro dib u dhac ku yimid helista ogeysiiska, badanaa waxaa sabab u ah daahitaanka nidaamka adeega bixiyaha taleefanka gacanta.

Maxaa dhacaya haddii ogeysiisku ku guuldareysto inuu baxo?

Haddii ogeysiisku guuldareysto, waxaa jira warbixin gaar ah oo loo diro maamulka iyo bixiyaha nidaamka ogeysiinta si cilada wax looga qabto.

Waa maxay sababta la ii soo ogeysiin waayay sidii aan horay la igu soo ogaysiin jiray? Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan ugu habeeyo nidaamkan?

Haddii aad jeclaan lahayd in lagu ogeysiyo ama haddii aanad helin ogeysiisyadaada, fadlan kala xiriir kooxdayada Balan Qabashada 206-205-5000 oo waydii wakiilka in lagu diwaan galiyo adeegan. Waxa kale oo aad soo sheegi kartaa wixii arrimo ah ee aad qabtid si uu wakiilku u xaqiijiyo lambarka telefoonkaaga iyo macluumaadka kale.

Ogeysiiska imaatinka dhow waxa loo diraa kaliya kuwa diiwaangashan moobilada ama telefoonada gacanta.

Eray Raadin

Word Search

R	I	D	E	R	S	E	R	V	I	C	E	S	C
D	I	S	P	A	T	C	H	C	A	X	I	T	W
K	F	F	R	O	C	T	L	L	V	D	R	T	D
R	C	S	A	L	O	P	L	I	T	A	N	I	T
I	T	B	S	R	N	I	S	E	F	T	W	T	T
F	P	E	O	A	E	C	O	N	A	O	K	I	F
F	A	F	V	O	K	K	E	T	L	T	A	X	I
F	E	L	D	S	K	U	P	F	C	O	I	I	L
O	O	X	S	O	T	P	R	I	R	A	N	A	P
P	S	O	K	I	R	E	C	T	I	O	R	I	T
O	E	P	C	S	V	C	I	O	R	L	V	R	P
R	V	S	I	O	R	V	A	T	T	P	C	I	S
D	D	P	V	R	I	O	E	A	A	C	D	S	L
U	P	D	R	V	T	M	T	R	A	N	S	I	T

- FARE
- CLIENT
- LIFT
- VAN
- TAXI
- OVERFLOW
- DROP OFF
- TRANSIT
- METRO
- ORCA
- PICK UP
- TRIPS
- DISPATCH
- BOOK
- RIDER SERVICES



Isbadel Ku Haboon Bey'ada Samee La Jiranka Wargeeska Access
Ma rabtaa inaad ku hesho Wargeeska Access iimayl ahaan badelki boostada joogtada ah? ka wac Xarunta Wicitaanka Access lambarka 206-205-5000 oo nasoo ogaysii.